



**SOMALI NATIONAL  
BUREAU OF STATISTICS**  
Federal Republic of Somalia

# TUSAHA SICIRKA BADEECADAHA

## ABRIIL 2023



## Warbixin kooban

Dhammaan qeybaha Tusaha Sicirka **Badeecadaha (TSB)** bishii Abriil 2023 ayaa gaaray 141.08, marka la barbardhigo 137.29 bishii Maarso 2022.

Isbedel bileedka, Abriil 2023, marka la barbar dhigo Maarso 2022, ayaa sare u kacay 2.76 boqolkiiba. Sare u kaca billaha ee ugu badan ayaa ahaa **Dharka & Kabaha (+9.01 boqolkiiba) Cuntada iyo Cabitaanda (+4.61 boqolkiiba)**. Sare u kaca ugu badan ee **Dharka & Kabaha** ayaa ka yimid qiimaha **Dharka (12.79 boqolkiiba)**. Sare ugu badan waxaa ka qeybqaatay **Dharka dumarka (25.64 boqolkiiba) dabaaldaga Ciida awgeed**. Qiimo kororka **Cuntada iyo Cabitaanada** ayaa waxaa sababay **Cuntada (4.73 boqolkiiba)**. sare u kaca ugu badan ka yimid qiimaha **Qudaarta (+22.54 boqolkiiba)**. (Jaantuska 2)

Guud ahaan, sicir bararka 12kii bilood ee la soo dhaafay Abriil 2022 iyo Abriil 2023 (heerka sicir bararka), dhammaan qeybaha TSB ayaa sare ukacay 6.15 boqolkiiba, marka la barbardhigo 5.68 boqolkiiba 12kii bilood ee la soo dhaafay Maarso 2022 iyo Maarso 2023.

### Shaxda 1: Tusaha Sicirka Badeecadaha; Abriil 2023 (Dec 2014 = 100)


Tusaha Sicirka Badeecadaha, Abriil 2023	
Tusaha bishan (Abriil 2023)	141.08
Tusaha bishii hore (Maarso 2023)	137.29
Tusaha sanadkii hore (Abriil 2022)	132.90
Isbedelka bilaha ah boqolkiiba %	2.76%
Isbedelka heerka sicir bararka sanadlaha ah boqolkiiba %	6.15%

### heerka sicir bararka marka loo eego TSB-da

Isbedelka boqolevda ee 12bilood

### Tixraca TSB-da

Index = 100 @ December 2014



Isha Xogta: NBS

War bixin bileedka bisha **Abriil 2023** (TSB) iyo faahfaahinta xili waqtiyeedka xogta ayaa lagu baahiyaa, websiteka Agaasinka <http://www.nbs.gov.so> Twitter: @NBS\_somalia

**Guud ahaan heerka Sicir Bararka: Dhammaan Qeybaha TSB, Abriil 2023**

Heerka sicir-bararka bisha Abriil 2023 waa isbedelka boqolleyda ee Tusaha sicirka badeecadaha (TSB) ee 12kii bilood ee la soo dhaafay, Abriil 2022 iyo Abriil 2023.

**Dhammaan qeybaha TSB** ayaa sare ukacay 6.15 boqolkiiba 12kii bilood ee la soo dhaafay, Abriil 2022 iyo Abriil 2023, marka labar bardhigo 5.68 boqolkiiba 12kii bilood, Maarso 2022 iyo Maarso 2023.

**Dhammaan qeybaha TSB isbedelka** billaha ah ee Abriil 2023 ayaa sameeyey sare u kac dhan 2.76 boqolkiiba.

**Guud ahaan heerka sicir bararka: qeybo ka mid ah badeecadaha, Abriil 2023.**


Sicir bararka qeybaha **cuntada iyo cabitaanada, guryaha, biyaha, korontada iyo gaaska** ayaa ah kuwa ugu saameynta badan badeecadaha oo dhan looguna isticmaalka badan yahay **dhammaan qeybaha TSB-da**.

**Cuntada iyo Cabitaanada** ayaa qiimahooda bilaha ahi sare u kacay 4.61 boqolkiiba, bishii Abriil 2023 marka la barbardhigo hoos u dhac gaaraya 2.31 boqolkiiba bishii Maarso 2023. Tani ayaa sababtay in qaar ka mid ah cuntada quutul daruuriga ah uu qiimahoodu sare u kaco. Sicir bararka sanadlaha ah ayaa hoos u dhacay 6.60 boqolkiiba bishii Abriil 2023. marka la barbardhigo sicir bararka sanadlaha ah oo gaaray 5.03 boqolkiiba Maarso 2023.

**Guryaha, Biyaha, Korontada iyo Gaaska** ayaa sameeyey dhaqdhaqaaq la'aan ah 0.00 bishii Abriil 2023. Sicir bararka sanadlaha ah ayaa sameeyey hoos u dhac dhan 5.71 boqolkiiba bishii Abriil 2023. Marka la barbardhigo sicir bararka sanadlaha ah 7.26 boqolkiiba ee Maarso 2023.


**Dhammaan qeybaha TSB-da & la xushay**

Index = 100 @ December 2014



## A. Qeybaha ugu weyn ee isbedelka Sanadlaha ah (TSB)

Jaantuska 1: Sicir bararka sanadlaha ee dhamaan qeybaha; Abriil 2023 (Dec 2014 = 100)



### Qeybaha ugu weyn ee sicirkooda Kordhay (+):

- **Tubaakada** ayaa la diwaangaliyey sare u kac sanadle ah oo gaaraya 84.76 boqolkiiba bishii Abriil 2023. Sare ukaca ugu badan ayaa ka yimid Qaadka (Miiraha ah) (+118.8 boqolkiiba).
- **Cafimaadka** ayaa lagu diwaan galiyey sare u kac sanadle ah 7.29 boqolkiiba, 12 bilood ee la soo dhaafay bishii Abriil 2023. Sare ugu badan ayaa ka dhashay qiimaha adeega bukaan socodka (+9.92 boqolkiiba).
- **Maqaayadaha & Hoteelada** ayaa sameeyey sare u kac sanadle 7.15 boqolkiiba bishii Abriil 2023. Sare u kaca ugu badan ayaa ka yimid hoteelada (+11.57 boqolkiiba).
- **Cuntada iyo Cabitaanada** ayaa qiimahooda sare u kacay 6.60 boqolkiiba, 12 bilood ee la soo dhaafay Abriil 2022 iyo Abriil 2023. Sare ugu badan ayaa ka dhashay qiimaha cuntada (+6.63 boqolkiiba). Qiima kororka waxaa ka qeyb qaatay Burka Qamadiga/sareenta oo gaaray (20.86 boqolkiiba).
- **Kirada Guryaha & Korontada** ayaa sameeyey sare u kac sanadle ah 5.71 boqolkiiba bishii Abriil 2023. Sare u kaca ugu badan ayaa ka yimid qiimaha Korontada, gaaska wax lagu karsado & shidalka (+13.34 boqolkiiba).
- **Agabka Guryaha, Qoyska & Dayactirka** ayaa laga diwaan galiyey sare u kac dhan 4.76 boqolkiiba Abriil 2023. Sare u kaca ugu badan ayaa ka yimid qiimaha Kabaha (+4.97 boqolkiiba).
- **Dharka & Kabaha** ayaa laga diwaan galiyey sare u kac dhan 3.94 boqolkiiba Abriil 2023. Sare u kaca ugu badan ayaa ahaa qiimaha dharka dumarka oo gaaray (+33.87 boqolkiiba) sababtoo ah guud ahaan qiimaha dharka ayaa kordhay (+9.58).
- **Alaabaha yaryar & Adeegyada** ayaa sameeyey sare u kac sanadle ah oo gaaraya 3.46 boqolkiiba Abriil 2023. Sare u kaca ugu badan waxaa sababay alaaboyinka daryeelka qofka oo qiimahoodu gaaray (+8.91 boqolkiiba).


War bixin bileedka bisha **Abriil 2023** (TSB) iyo faahfaahinta xili waqtiyeedka xogta ayaa lagu baahiyaa, websitaka Hay'adda Istaatistikada Qaranka Soomaaliya. <http://www.nbs.gov.so> Twitter: @NBS\_somalia

### Qeybaha ugu weyn ee Sicirkoodu hoos u dhacay bisha Abriil 2023 (-)

- Guud haan majirin hoos u dhac la taaban karo bishii Abriil.

### B. Qeybaha ugu waa weyn ee saameeya qeybaha kala duwan ee TSB -da

**Jaantuska 2: TSB; Isbedelka Sicirbararka ee bilaha dhamaan qeybaha; Abriil 2023 (Dec 2014 = 100)**



### Qeybaha ugu weyn ee Sicirkoodu kordhay Bisha Abriil 2023 (+)

- **Dharka & Kabaha** ayaa qiimahooda bilaha ahi sare u kacay 9.02 boqolkiiba Abriil 2023. Sare u kaca ugu badan ayaa ka yimid qiimaha Kabaha (+25.64 boqolkiiba) sare u kaca waxaa sababay dharka +12.79 boqolkiiba
- **Cuntada iyo Cabitaanada** ayaa qiimahooda bilaha ahi sare u kacay 4.61 boqolkiiba, bishii Abriil 2023. Qiima kororka ugu badan ayaa yimid qiimaha Cuntada +4.73 boqolkiiba.

### Qeybaha ugu weyn ee Sicirkoodu Hoos u dhacay Bisha Abriil 2023 (-)

- Guud haan majirin hoos u dhac la taaban karo bishii Abriil.

## Shaxda 2: Isbedelka tusaha sicirka ee qeybaha badeecadaha Abriil 2023 ee habka (COICOP)

Habka kalasaarida caalamiga ee COICOP	TSB Weight	Abriil 2022 TSB	Maarso 2022 TSB	Abriil 2023 TSB	% Boqolkii ba Bishan iyo Bishii hore	% Boqolkiiba Isbedelka Sanadkii Hore iyo Sanadkaan
<b>Dhamaan Qeybaha Tsb</b>	100.00	132.90	137.29	141.08	2.76	6.15
Cuntada & Cabitaanada	46.04	142.90	145.61	152.33	4.61	6.60
Tubaakadda	1.25	86.47	159.76	159.76	0.00	84.76
Dharka & Kabaha	5.03	159.56	152.13	165.84	9.01	3.94
Guryaha, Biyaha, Korontada, Gaaska & Shidaalka Kale	23.41	121.67	128.62	128.62	0.00	5.71
Agabka Guryaha	2.93	109.53	114.74	114.74	0.00	4.76
Caafimaadka	5.00	161.16	172.91	172.91	0.00	7.29
Gaadiidka	3.77	111.13	109.51	109.51	0.00	-1.45
Isgaarsiinta	2.80	103.03	103.03	103.03	0.00	0.00
Hawo Bedeleshada & Dhaqanka	1.00	103.85	103.85	103.85	0.00	0.00
Tacsiinta	4.00	109.11	109.11	109.11	0.00	0.00
Maqaayadaha & Hoteelada	2.00	136.05	145.78	145.78	0.00	7.15
Alaabaha Yaryar & Adeegyada	2.77	110.21	114.03	114.03	0.00	3.46

### Ogeysiis:

Tusaha Sicirka Badeecadaha waa sahan ku saabsan badeecadaha iyo adeegyada ay isticmaalaan qoysaska caadiga ah. Xogta sahanka waxaa la soo ururiyaa Todobaadka koowaad iyo kan sedexaad ee bilkasta. Sicirka badeecadaha iyo adeegyada waxaa laga soo ururiyaa goobaha ganacsiga ee afarta suuq ee ugu waa weyn Magaaladda Muqdisho.


### Soosaarida tan xigta

Tixraaca Sicirka Badeecadaha (TSB), Maajo, 2023 waxaa la baahin doonaa 15 Juun, 2023. Wixii faahfaahintaasi dheer ee ku saabsan (TSB) iyo xogaha kale ee rasmiga kala soco Xafiiska Istaatistikada, Fadlan booqo Bogeena rasmiga ah ee <http://www.nbs.gov.so>

**Lifaaqa 1aad: Dhammaan Qeybaha 'TBS' – qeybaha ka qeyb qaata heerka sicir-bararka bishii Abriil 2023 marka loo eego COICOPka**

**Dhamaan qeybaha TSB-da**

Qeybaha ka qeybqaata (%) heerka sicir bararka ( COICOP)



Isha Xogta: NBS

**Lifaaqa 1aad** wuxuu bixiyaa falanqeyn kusaabsan heerka sicir bararka ee Bishsa oo loo qeybiyey iyo is barbardhiga qeybaha, ayada oo loo eegayo qeybaha COICOP loona soo bandhigayo sida ay u kalasaameyn badan yihiin (ka qeyb qaadashadooda) dhamaan qeybahaha 'TSB' ka.

War bixin bileedka bisha **Abriil 2023** (TSB) iyo faahfaahinta xili waqtiyeedka xogta ayaa lagu baahiyaa, websiteka Hay'adda Istaatistikada Qaranka Soomaaliya. <http://www.nbs.gov.so> Twitter: @NBS\_somalia